



# ADEEGYADA GANACSIGA

First National Bank Building,  
332 Minnesota Street, Suite N201  
Saint Paul, MN 55101  
[business.services@state.mn.us](mailto:business.services@state.mn.us)  
651-296-2803

## Sharciga Cusub ee Warbixinta Federaalka ee Macluumaadka Milkiilaha Faa'iidaya (Beneficial Ownership Information [BOI])

Laga bilaabo Janaayo 1, 2024, shirkado badan oo ku yaal Mareykanka ayaa laga raabaa in ay ka warbixiyaan macluumaadka ku saabsan **milkiilayaasha faa'iidada helaya** - dadka ugu dambeyntii leh ama maamula shirkadda una gudbiyaan - Waaxda Mareykanka ee Shabakadda Dhaqangelinta Dambiyada Maaliyadeed ee Maaliyadda (Department of the Treasury's Financial Crimes Enforcement Network [FinCEN]). Diiwaangelintani waa **bilaash** waxaana looga buuxin karaa si onlaynka ah [www.fincen.com/boi](http://www.fincen.com/boi).

### MIYAA LA IGAGA BAAHAN YAHAY INAAN WARBIXIN GUDBIYO?

Inta badan ganacsiyada Minnesota waa ganacsiyo yaryar oo laga yaabo inay u baahdaan in ay warbixinta gudbiyaan.

Shirkaddaadu waxay u baahan kartaa in ay ka warbixiso macluumaadka ku saabsan milkiilayaasheeda faa'iidada leh haddii ay tahay:

1. Shirkad weyn, shirkad yar oo mas'uuliyyad xaddidan leh (limited liability company [LLC]), ama shirkada si kale looga abuuray gudaha Mareykanka iyadoo la xareeyay dukumeenti laga xafiiska xoghey dawladeed ama xafis kale oo la mid ah oo hoos imaanaya sharciga gobolka ama qabiilka Hindida Mareykanka; ama
2. Shirkad ajnabi ah oo u diiwaangashan in ay ganacsi ka samayso gobol kasta oo Maraykan ah ama qabaa'ilda Hindida Mareykanka ah.

23 nooc hay'ado ah ayaa laga dhaafay shuruudaha warbixinta ee milkiilayaasha faa'iidada helaya. Tilmaamaha U Hogaansanaanta Hay'adda Yaryar ee FinCEN waxa ku jira liis hubin ah oo tusinaya mid kasta oo ka mid ah 23 ka/da hay'adood ee laga dhaafay taas oo kaa caawin doonta in aad go'aansato in shirkaddaadu u qalanto ka-dhaafitaanka iyo in kale. Booqo [www.fincen.gov/boi](http://www.fincen.gov/boi) ama sawiro koodka QR si aad u gasho hagaha oo aad u hubiso in shirkadaada laga dhaafay iyo in kale.



Hagaha u  
Hogaansanaanta  
Sharciga ee  
Hay'addaha Yaryar

### SIDEE IYO GOORMA AYAAN WARBXIN SAMEEYAA?

Shirkadaha soo wargelinaya waa in ay si elektaroonig ah warbixinta macluumaadka milkiilayaada faa'iidada leh ugu soo gudbiyaan iyaga oo u maraya boga internetka ee FinCEN: [www.fincen.gov/boi](http://www.fincen.gov/boi).

FinCEN waxay bilowday in ay aqbasho warbixinada Janaayo 1, 2024.

- Haddii shirkaddaada la abuuray ama la diiwaan geliyay ka hor Janaayo 1, 2024, waxaad haystaa ilaa Janaayo 1, 2025 si aad BOI warbixin ugu gudbiso.
- Haddii shirkaddaada la abuuray ama la diiwaan geliyay Janaayo 1, 2024 kadib, waa inaad ku soo wargelisaan BOI 90 maalmood gudahooda ee ogeysiiska abuurista ama diiwaangelinta shirkadda. Laga bilaabo 2025, daaqada/mudada warbixintan waxay noqon doontaa 30 maalmood.
- Wixii cusbooneysiin ah ama sixid ah oo ku saabsan macluumaadka milkiilaha faa'iidada leh ee aad hore ugu xaraysay FinCEN waa in lagu soo gudbiya 90 maalmood gudahood.